



Nambarka diiwaanka waxaa hadda lagu siinayaa adigoo aan samayn wax codsi u gaar ah, haddii lagu siiyay ogolaanshaha sharciga degganaanshaha Finland.

Haddii lagu siiyo sharciga degganaanshaha Finland (cqaamad, magangalyo qaxootinimo, ama aad is diiwaangeliso adigoo ah qof u dhashay wadamadda midowga yurub, waxaa laga bilaabo 1.2.2019 iyo wixii ka dambeeyay si oottomaatig ah laguugu diiwaangelinayaan nidaamka warbixin-ta dadweynaha. Islawaqtigaasna waxaa lagu siinayaa nambarka diiwaanka ee Finland.

Arrinkaan waxaa uu kaaga baahan yahay, in aad soo buuxiso shuruudaha ama waxyaabaha looga baahan yahay diiwaangelinta. Waxyaabahaas loo baahan yahay waxaa ka mid ah, in hawlwa-deennada Finland ay aqoonsadaan nambarkaaga diiwaanka.

Awal qofka codsadaha ah waxaa ay ahayd in uu diiwaangelinta si gaar ah u dalbado.

Nambarka diiwaanka waxaad heli kartaa hal mar oo kaliya

Haddii mar hore lagu siiyay nambarka diiwaanka ee Finland [henkilötunnus](#), Waaad ku sheegtaa arrinkaan marka aad samaynayo cogsiga sharciga degganaanshaha Finland. Nambarka dii-waanku ma dhaco, waxaadna heli kartaa ama lagu siin karaa halmar oo kaliya.

Nambarka diiwaanka waxaad ka arki kartaa kaarka sharciga degganaanshaha Finland ama kaarka degganaanshaha

Nambarkaaga diiwaanka waxaad ka hubin kartaa kartaa kaarka sharciga degganaansha Finland (cqaamadda), kaarka degganaanshaha, ama waraaqda diiwaanka ee laga soo qaato xarunta diiwaanka dadweynaha (Väestörekisterikeskus). Waraaqda waxaa lifaaq ahaan laguugu soo raa-cinaya go'aankaaga.

Xusuusnoow in aad tagto xafiiska diwaangelinta (maistraatti)

Helitaanaaka ma siismada lagu siiyay nambarka diiwaanka macnaheedu ma ahan in adiga si oottomaatig ah laguugu diiwaangelinayo mid ka mid ah magaaloyinka, waxaa macnaheedu yahay in goob deegaan aan lagu siinayniin [kotikunta](#). Arrinkaas awgiis iyo in si dhab ah warbixintaada loo diiwaangeliyaba, waxaa lagaa doonayaa, in aad adigu shakhsii ahaan tagto xafiiska diiwaan-gelinta ee ku yaalla goobta aad ku sugar tahay.